

Noqoshada jaar wanaagsan

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. Fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng chữ lớn, băng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]



Awarded for excellence



INVESTOR IN PEOPLE



North River Alliance

Gateway Housing Association

409-413 Mile End Road, London, E3 4PB

Residents: 020 8709 4300

General enquiries: 020 8909 4409

Fax: 020 8709 4400

Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk

www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.

Being a good neighbour
– Somali translation

Waa inaad ilaalisaa shuruudaha heshiiskaaga degaanshaha. Tan waxa ka mid ah inaad si habboon u dhaqanto oo tixgeliso dadka kale.

Qof kastaaba wuxuu xaq u leeyahay inuu gurigiisa ugu raaxaysto bilaa qaylo iyo si nabad ah. Ha samaynin sanqadh badan, ha dhibaatayn oo ha rabshin jaarkaaga. Hubaal ka dhig in cidii kula nool ama gurigaaga soo booqanaysaa ay u dhaqmaan si habboon.

Haddii ay jaarkaaga dhibaato idinka dhaxayso, la hadal. Inta badan dadku ma ogsoona inay dad kale dhibaataynayaan. Si akhlaaq leh ugu sharax inay ku dhibaataynayaan.

Waxaanu u aragnaa inuu jaarka wanaagsani yahay qofka fahma hab nololeedka dadka kale ee ka duwan, gurigooda ilaaliya una ogolaada jaarkooda inay qaylo la'aan ugu raaxaystaan guryahooda.

Isqabsashada mar keliya ah ee jaarka dhexdiisa sida caadiga ah jaarka ayaa xallin kara. Ka wada hadal akhlaaq leh ayaa inta badan ku filan inuu dhibaataada xalliyo. Haddii ay xaaladu sii socoto ama ay kasii darto. Waa inaad la soo hadashaa sarkaalkaaga guryaha 020 8709 4300, xitaa haddii aanu jaarkaagu ahayn qof deggan guryaha Gateway.

Waxa kale oo aanu dhiirigelinaa 'heshiisyada jaarka ee wanaagsan' oo adiga iyo jaarkaagu aydun isku waafaqaysaan waxaad u malaynaysaan inay yihiin hab dhaqan wanaagsan isla markaana aad saxeexaysaan inaad heshiiska ilaalisaan.

Waa tan talo fiican oo ku saabsan ahaanshaha jaar wanaagsan

▪ U sii dig jaarkaaga haddii aad samaynayso wax sanqadh dheer leh (tusaale ahaan, wax daloolin, wax garaacis ama haddii aad baadhi samaysanayso).

▪ Dhawaaqa raadiyaha, isteeriyowga iyo telifishanka heer macquul ah gee, markasta maalintii oo dhan. Qalabkan ha dhigin gidaarada aad la wadaagto guryaha kale. Dul saar khadiifad rabadh ah ama kaarbetyo.

▪ Hubaal ka dhig inaad qabato shaqadaada guriga ama DIY waqtiyo macquul ah oo maalintii ah. Dhawaaqa gurigaaga iyo hareerhiisa yaree laga bilaabo 9 habeenimo illaa iyo 8da subaxnimo.

▪ Haddii aad goor dambe guriga ku soo noqoto sanqadh ha samayn. Albaabada hakaga qabsiin, hoonka baabuurka ha garaacin ama saaxiibadaana ha u qaylinin.

▪ Qashinkaaga ku rid biinanka lagu siiyey hubaalna ka dhig in aagga biinanku yaalliin ay nadiif ahaadaan. Haddii aad hayso qashin aad u badan ama alaabo aanad u baahnayn, dawladdaada hoose ayaa lacag la'aan ku qaadi karta.

▪ Si masuul ah gaadhigaaga u baarkin garee oo ha xanibin adeegyada gurmada degdegga ah. Baabuurka ha kaga shaqayn meelaha baabuurta la dhigto ma ha kaga tegin baabuurkaaga

xaalad khatar ah. Dawladda hoose ayaa ku qaadi doonta baabuur kasta lacag la'aan (sannadkiiba mid) haddii aad ka codsato inay sidaas sameeyaan.

▪ Haddii aad beer leedahay, hubaal ka dhig inaad habayo oo nadiifiso. Tan waxa laga yaabaa inuu macnaheedu noqdo inaad qashinka ka gurto ama cawska iyo doogga aad goyso. Beer kasta oo isku dhex daadsani ma qurux badna oo keliya, laakiin waxay bilicda ka dishaa aagga aad ku nooshahay.

▪ Haddii aad leedahay xayawaanka la rabbaysto ahow masuul. Haddii aad ey leedahay hubaal ka dhig inaanu ciyin ama ooyin muddo dheer waqti ah. Haddii aad guriga ka maqantahay muddo dheer eygaaga kelidii ha kaga tegin guriga. Waa masuuliyadaada inaad xayawaankaaga kaantarooashid goobaha dadweynaha kadibna aad nadiifisid.

▪ Hubaal ka dhig in adiga iyo ciyaalkaaguba aad ka fekertaan sida ay caadooyinka ciyaareed ee carruurtaadu u saamayn karaan jaarkaaga.

Xusuusnow, tixgeli dadka kale ulana dhaqan oo keliya jaarkaaga sida aad jeceshahay in adiga laguula dhaqmo!